

# FURSADA LOO SIMANYAHAY SHARCI AHAAN

Sharciga ayay ka soo horjeedaa qof kan hela caawimada dhaqaalaha Federaalka in loo takooro qaababka soo socda: In lootakooro qof kasta oo jooga Maraykanka, qaab isir, midab, diimeed, sinji (ay ka mid tahay uurka, dhalista ilmaha, iyo xaalada caafimaad ee la xidhiidha, qaabka labbada sinji, heerka sinji beddelka qofka ah, iyo aqoonsiga sinjiga), asalka qaranka (ay ka mid tahay aqoontiisa xadidan ee Ingiriisiga), da'da, naafanimada, ama cida siyaasad ahaan lala feker yahay ama caqiidada, ama, ku lid ah ka faa'iidayste kasta, codsade, ama ka qayb galaha barnaamijka dhaqaalaha ee lagasiyo adeegga Title I ee Dib u habbaynta Workforce Innovation and Opportunity Act, ee qaababka heerka muwaadinimada qofka ama ka qayb galka WIOA Title I–barnaamijka dhaqaale ahaan la kaalmeyo ama hawsha.

Qofka caawimaada helayaa waa inaanu wax u takoorin wax sababaha soosocda midkoodna:

Go'aan ka gaadho cida loo oggolaanayo, ama helaya, mid kastoo ka mid ah WIOA Title I– barnaamijka dhaqaale ahaan la kaalmeeyo ama hawsha;Siinta fursado, ama ula dhaqanka dadka si xushmad leh, sida barnaamijka ama hawsha; ama gaadhida go'aanada maamulida, ama arimaha laxariira, barnaamijka ama hawsha noocaas ah.

Dadka helaya kaalmada dhaqaalaha federaalka waa inay qaadaan tallaabooyin macquul ah si ay u xaqiijiyaan in xidhiidhka ay lasameeyaan dadka naafada ah uu yahay mid lamid ah kan ay sameeyaan dadka caafimaadka qaba. Tan macnaheedu waxa weeye, marka la codsado oo aanay qofka kharash ku joogin, dadka helaya taageerada dhaqaale waxaa looga baahanyahay inay siiyaan kaalmooyin caawin ah oo habboon dadka u qalma ee naafada ah.

## WAXA LA SAMAYNAYO HADDII AAD RUMAYSANTAHAY INAAD LA KULLANTAT TAKOOR

Haddii aad u malaynayso in lagugu takooraybarnaamijka WIOA Title I– ee caawinta dhaqaale ama hawsha, waxaad soo gudbin kartaa cabasho gudaha 180 maalmood laga bilaabo taariikhda xad gudubka la tuhunsantahay ee mid kastoo soo socda:

Heerka Degmada	Heerka Gobolka	Heerka Federaalka
<p>Kathy Talford Equal Opportunity Officer Workforce Resource 401 Technology Drive E. Menomonie, WI 54751 Phone: 877-711-9390 Ext.1011 Fax: 715-232-2240 TTY/TDD-WI Relay Services: 711 Email: <a href="mailto:talfordk@workforceresource.org">talfordk@workforceresource.org</a></p>	<p>Susana Vázquez García Equal Opportunity Officer Wisconsin Department of Workforce Development Division of Employment and Training 201 E Washington Ave, Room E 100 PO Box 7972 Madison, WI 53707-7972 (608) 405-4067 TTY access via WI Relay: 711 Email: <a href="mailto:DETEOContact@dwd.wisconsin.gov">DETEOContact@dwd.wisconsin.gov</a></p>	<p>Director, Civil Rights Center (CRC) U.S. Department of Labor 200 Constitution Avenue NW, Room N-4123, Washington, DC 20210 or electronically as directed on the CRC website at <a href="http://www.dol.gov/crc">www.dol.gov/crc</a></p>

Haddii aad cabasho u soo gudbiso qofka hela, waa inaad sugtaa miduun ilaa qofka helaa uu soo saaro Ogaysiiska Go'aanka Ugu dambeeya oo qoran, ama ilaa 90 maalmood ay dhaafto (ku kasta oo degdeg bata), ka hor ku soo gudbinta Xurunta Xuquuqaha Madaniga ah (eeg cinwaanka sare).

Haddii qofka hela taageerada dhaqaale aanu kugu siin Ogaysiiska Go'aanka Ugu dambeeya 90 maalmood gudahood laga bilaabo maalinta aad soo xaraysay cabashadaada, waxaad ku soo gudbin kartaa cabashada CRC ka hor intaanad helin Ogaysiiska. Si kastaba ha ahaatee, waxaad soo soogudbin kartaa cabashadaada CRC 30 maalmood gudahood ee muddada loo qabtay ee 90 maalmood ah (si kale haddii loo dhigo gudaha 120 maalmood ka dib maalinta aad ku soo gudbisay cabashada qofka hela).

Haddii qofka hela taageerada dhaqaale uu ku siiyo Ogaysiiska Go'aanka Ugu danbeeya ee soogudbinta cabshadaada, laakiin aanad ku qancin go'aanka ama xalka, waxaad usoo gudbin kartaa cabasho CRC. Waa inaad ku soo gudbisaa cabshadaada CRC 30 maalmood gudahod laga bilaabo taariikhda aad heshay Ogaysiiska Go'aanka Ugu danbeeya.